## XUQUUQDA RACFAAN-QAADASHADA (APPEAL RIGHTS)

Sida hoos imaata Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 388-02-0525 iyo Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 34.05.464, amarkani wuxuu noqonayaa kama dambays 21 maalmood ka dib taariikhda boosto soo dhigista, haddii aysan ka ahayn in:

1. Adiga ama dhinac kasta oo dacwada ka mid ah aad ka fayl garaysaan rafcaan (codsi dib u eegis) Guddiga Racfaanka 21 maalmood gudahooda ka dib taariikhda amarkan la soo diray (ka eeg taariikhda boosto soo dhigista ee ku yaal Shaacinta Adeegga ee sare); ama
2. Adiga ama dhinac kasta oo dacwada ka mid ah aad xaraysataan codsi ku saabsan kordhinta 21-ka maalmood ee kama dambaysta ah, oo garsooraha dib u eegistuna go'aamiyo inaad u haysataan sabab wanaagsan oo ku aadan muddo kordhin sida hoos timaada WAC 388-02-0580(2); ama
3. Adiga ama dhinac kasta aad xeraysataan codsiga dib u eegis oo daahay wax aan ka badnayn 30 maalmood ka dib 21-ka maalmood ee kama dambaysta ahayd, oo garsooraha dib u eegistana uu go'aamiyo inaad haysataan sabab wanaagsan oo aad ku sameysateen codsiga daahsanaa sida hoos timaada WAC 388-02-0580(3).

Ciwaanka boostada ee u xaraynta codsiga dib u eegista waa:

Board of Appeals
P.O. Box 45803
Olympia, WA 98504-5803

Haddii aad doorato inaad u xaraysato codsi dib u eegis, waxaad isticmaali kartaa foomka iyo tilmaamaha la socda amarkan.

TUSALE

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

**CODSIGA DIB U EEGISTA GO'AANKA HORE (RACFAAN) (PETITION FOR REVIEW OF INITIAL DECISION (APPEAL)**

Daabac ama ku qor jawaababha oo faahfaahsan. Ku dar boggag badan haddii loo baahdo. axaad isticmaali kartaa foom aad adiguba leedahay.

| | | |
|---|---|---|
| | Lambarka Kiiska | |
| MAGACA(YADA) (FADLAN KU QOR FAR WAAWEYN) | LAMBARKA AQOONSIGA | LAMBARKA HAY'ADDA |

| | | | |
|---|---|---|---|
| CIWAANKA BOOSTADA WAX LOOGU DIRO | MAGAALADA | GOBOLKA | KOODHKA ZIP-KA |

KOODHKA LAMBAR-TALEEFOON EE AAGGA IYO LAMBARKA

Fadlan sharax sababta aad u rabto in la beddelo amarkii hore. Isku day inaad si gooni ah u qeexdo. Tusaale ahaan, noo sheeg:

1. Waa maxay sababta aad ugu malaynayso in go'aanku yahay mid khaldan (maxaad u khilaafsan tahay).
3. Sida ay tahay in go'aanka loo beddelo.
2. Natiijooyinkee xaqiiqda ah ayaa ah kuwo khaldan.

Waxaan codsanayaa in dib loo eego go'aankii hore sababtoo ah...

Waxaan ku soo lifaaqay ____ bog.

| | | |
|---|---|---|
| MAGACAAGA FAR WAAWEYN KU QOR | SAXIIXA | TAARIIKHDA |

**Kama-dambaynta: Waxaa la helay 21 maalmood ama ka hor taariikhda boosto soo dhigista ee Go'aankii Hore**

Boostada Ugu Dir: Board of Appeals
P.O. Box 45803
Olympia, WA 98504-5803

TUSAALE

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

Haddii Aad Khilaafto
Racfaan Ayaad Qaadan Kartaa

1. **<u>WAKHTIGA KAMA DANBEYSTA ee Racfaan-qaadashada</u>**: Guddiga Racfaanadu waa inuu <u>helaa</u> racfaankaada kow iyo labaatan (21) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda boostada lasoo dhigay ee lagu muujiyay gudaha go'aanka dacwad dhegeysiga ee ku lifaaqan halkan. Waa in la helaa markey tahay ama ka hor maalinta 21-aad ama way daahi doontaa oo waxaa laga yaabaa inaan la aqbalin. Fadlan ku soo dir boostada ka hor wakhtiga kama dambaysta ah si aad waxkhti u siiso gaadhsiinta. Haddii aad seegto wakhtiga kama dambaysta ah, waxaad waayi kartaa dhammaan xuquuqaha aad racfaan uga qaadan karto go'aanka.

2. **<u>Haddiii Aad U Baahan Tahay Wakhti Dheeraad ah</u>**: Garsooraha dib u eegista ayaa dib u dhigi kara (dib u dhigi kara, kordhin kara muddada) wakhtiga kama dambaysta ah, laakiin waa inaad ku codsataa kow iyo labaatanka (21) maalmood gudahooda ee wakhtiga xaddidan.

3. **<u>Yaa Racfaan Qaadan kara</u>**: Guud ahaan, qof kasta oo go'aanku si toos ah u saameeyo.

4. **<u>Sida Racfaan Loo Qaato</u>**: Isticmaal foomka ku lifaaqan ama sameeyso mid adiga kuu gaar ah. Waa inaad u dirtaa ama u gudbisaa Racfaanka Guddida Racfaanada (ciwaanka ka eeg hoos). Xaqiiji inaad haysato nuqul.

5. **<u>Nuqullada La siinayo Dhinacyada Kale:</u>** Waa inaad u dirtaa ama gaarsiisaa nuqulka racfaanka (iyo lifaaqyada) dhinac kasta oo kale oo arrintan ay khuseeyso.

6. **<u>Maxaa Dhacaya Marka Xigta</u>**: Guddiga Racfaanka ayaa ku wargelin doona dhammaan dhinacyada marka ay helaan racfaan ama codsi ku aadan waqti dheeraad ah. Garsooraha Dib u Eegista (Review Judge, RJ) ayaa akhrin doona dhammaan dukumeentiyada la xidhiidha kiiska oo waxa uu dhegaysan doonaa duubista dacwad dhegeysiga. RJ wuxuu kaloo tixgelin doonaa sharciga iyo doodaha ay dhinacyadu soo gudbiyaan. RJ waxa uu go'aansan karaa in uu tixgaliyo cadaymo cusub iyo inkale (taas oo ah, wax aan la tixgalinin wakhtigii dacwad dhegeysiga). <u>RJ MA qaban doono dacwad dhageysi cusub</u>. RJ ayaa markaas qori doona go'aan wuxuuna u diri doonaa dhammaan dhinacyada. RJ waxa laga yaabaa inuu ku raaco ama wax ka beddelo go'aanka laga racfaan qaatay. RJ waxa uu amri karaa dacwad dhageysi cusub iyo/ama go'aan cusub. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka RJ ee racfaanka, waxaad awoodi doontaa inaad racfaan ka qaadato maxkamadda sare, ama waydiisato RJ inuu dib u eego go'aanka, ama labadaba. Waxaad heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan heerka xiga ee xuquuqda rafcaanka marka aad hesho go'aanka dib u eegista.

7. **<u>Haddii Aad U baahan Tahay Caawimo</u>**: Haddii aad lahayd qof (sida qareen ama saaxiib) kugu matalo dacwad dhegeysiga, la xidhiidh isaga ama iyada. Haddii aad u malaynayso inaad u baahan tahay looyar ama talo sharci, kala xidhiidh Northwest Justice Project (Mashruuca Cadaalada ee Waqooyi Galbeed) Khadka CLEAR lambarka (888) 201-1014. Laguuma dammaanad qaadayo inaad u heli karto qareen si bilaash ah.

8. **<u>Turjumaada iyo Caqabadaha Aragtiyeed</u>**: Haddii aadan akhrin oo aanad wax ku qorin karin Ingiriisiga, waxaad soo gudbin kartaa oo aad heli kartaa waraaqo ku qoran afkaada hooyo. Haddi ay dhib kaa heysato xagga aragga, waxa aad xaq u leedahay in aad soo gudbiso oo aad ku hesho waraaqaha qaab kale sida farta indhoolaha ama far waaweyn. Ha ogaadaan Guddiga Racfaanka baahiyahaada.

TUSAALE

| U dir ama gaarsii Racfaankaaga (Codsiga Dib u eegista) OFFICE OF APPEALS (XAFIISKA RAACANKA): | |
|---|---|
| CIWAANKA BOOSTADA WAX LOOGU DIRO<br><br>BOARD OF APPEALS<br>P.O. BOX 45803<br>OLYMPIA WA 98504-5803 | GOOBTA ADEEGGA EE SHAKHSI AHAANEED<br><br>DSHS Board of Appeals<br>1115 Washington Street SE<br>Olympia, Washington 98501 |
| FAKISKA<br><br>1-360-664-6187 | TALEEFOONKA (wixii macluumaad dheeraad ah)<br>1-360-664-6100<br>1-877-351-0002 (lambarka sida bilaashka ah loo wici karo) |

TUSAALE